## Ma ogtahay in Kelimatul Tawxiid ay sharuudo leedahay?

Qaar badan oo naga mid ah haddi la weydiyo, "Sidee ku noqotay Muslim?" ama "Sidee ku soo gashay Islaamka"? "Lailaha İllallah Muxammadun Rasuulullah!" Annagu sidaas ayaanu nidhi oo Muslimiin baannu noqonnay. Ayaanu leenahay.

Markaas kadib: "Kelmaddan ayaad tiri si'aad Islaamka u soo gasho, laakiin haddii su'aal labaad la is weydiyo, ee ugu horeyn Alle (c.j) maka aqbalay kelmaddan? waxaa laga yaabaa inaan la yaabno su'aashan. Aan ku sharaxno arrinta tusaale:

Waxa annagu salaadda u tukana si uu Alle (c.j) raali naga noqdo. Si ay salaadda u ansaxdo oo u aqbalo Alle (c.j) wuxuu ku xiray shuruuddo. Waxey tanina ku suurta'galeysa markaad ka fogaato waxyaabaha kharribaya (burinnaya) markaas kadibna sharuuddaha salaadda ay leedahay aad fulisid.

Si ay salaadda u ansaxdo; marka hore waad weyseysaneysa, qiblada u jeedsaneysa, oo waad niyeysaneysa iyo xilliga salaadda haddaynu ka fogaano ficillada buriya iyada salaaddaada waa ansax. Hagaag, kuwaan buuxin shuruuddahaas oo marka ay tukanayaan wax sameeya, wax cunna, wax cabba, oo la hadlaaya dadka agtiisa jooga, qofkaasi salaaddiisa ma ansaxeysaa? Dabcan maya… Kelmadda "Lailaha İllallah" waa sidaasi oo kale. Si kelmaddan uu Alle (swt) kaaga aqbalo, waa in shuruuddaheeda lagu sugnaada illa ay nafta kaa baxeyso, si ay tuwaani u ansaxdo, waxa jira waxyaabo la rabo in laga fogaado, oo haddiina laga fogaanin ay kelmaddan kharribmeyso (bureyso). Haddii uu qofka kelmaddan boqolaal jeer ku celceliyo isagoon fulin waxyaabaha laga rabo inuu sameeyo, tani waxba uma tareyso oo faa'ido uma sameyneyso.

### Waa maxay Dhaaquut?

In la diido lagana fogaado Dhaaquut; waa sharuudda ugu horeysa ee kelmaddan lagu aqbalo, Nebiyada oo dhan waxaa loo soo diray in ay xaqiiqdan dadka ugu yeedhaan.

**"Hubaal, annagu ummad kasta waxaan u dirnay Rasuul, si uu dadka ugu yeedho in Alle la caabuddo oona laga fogaado (bara laga noqdo) Dhaaquut. Qaar ka mid ah Alle wuu hanuuniyey, qaarna waxa xaq ku noqday in ay dhumman. Dhulka ku socda oo eega sid ay noqotay cidhibtii kuwii beeniyey."** (16/Nahl, 36)

Waxa uu Alle (c.j) aayad kale ku fasirey oo ku tilmaamay Lailaha İllallah 'xajin adag mise xadhig adag oo aan go'ayn', yacni ku dhegganaanshaha Kalimatul Tawxiid waxa ay ku suurtogashaa in la inkiro dhaaquut oo bara laga noqdo ayuu isaga inoo sheegay.

**"Qasab ma aha Diinta galideedu, Xaqqa (limaanku) si cad ah ayuu ugu soocanyahay Baadida. Qofkii (diida, ku takfiira, bara ka noqdaa oo inkira Dhaaquut oona rumeeya Alle. Waxey ka dhigan tahay inuu qabsaday xadhig adag oo aan go'ayn waana (Kalimatul Tawxiid) oona wuxuu soo galay diinta islaamka. Alle waa Samiic (mid maqla iyo aqbala ducada) waa Calim (mid wax walba og)."** (2/Baqara, 256)

Xadhiga adag ee aan go'aynin ee Islaamku waa Kalimatul Tawxiid. Ehelka Kalimatul Tawxiid In'aad ka mid noqoto oo wax kuu tarto, laba shardi ayaa lagu sheegay si qofka faa'ido ugu noqoto: in la diido oo bara laga noqdo Dhaaquut iyo in la rumeeyo Alle (Swt).

Dhaaquut waa mawduuc Qur'aani ah, waxaana lagu sheegay siddeed aayadood oo kala duwan oo Qur'aanka ah. İn bara laga noqdo Dhaaquut, waa mid ka mid ah mawduucyada ugu muhiimsan ee Islaamka waana ajandaha guud ee nebiyada oo dhan. (eeg 16/Nahal, 36)



## Sida Qur'aanka lagu xusay Dhaaquut waa;

- Kuwa dadka ugu yeedhaya tixraac aan aheyn Qur'aanka, dadkana kasoo saaraya waxyiga nuurkiisa una saaraya shirkiga mugdigiisa, tixraaacoodana waa sida siyaasadda, dhaqanka bulshada leeday iyo Diintooda. (eeg 2/Bakara, 257)
- Dhaaquut; Waa wax laga dhigtay sanam, oo iyaga dartood loo noolaado, loona dhinto, laguna go'aamiyo cidda saaxib ah iyo cidda caddow ah, oo aan sharcinimadda ka qaadan Alle (c.j) iyo waana waddooyinka la raaco. (eeg 4/Nisa, 76)
- Dhaaqut waa kuwa soo saara sharci ka dhan ah sharciga Alle (swt), dadkana ugu yeedha shakhsiyaadkaas iyo hay'adaha iyo sharciyada ay dejiyeen. (eeg 4/Nisa, 60)
- Dhaaqut; waa wax kasta oo Alle (swt) ka sokow la caabudo; loo jeclaado sida Alle (swt) oo kale, laga cabsado iyo waa dhammaan noolaha iyo kuwa aan noolayn ee si dhab ah loo addeeco (eeg 39/Zumer, 17). Qof kasta oo sheeganaya in uu Alle (swt) rumeeyay oo hadana diidin, bara ka noqonin Dhaaquut waxa uu qofkaasi rumeysan yahay Dhaaquut, addoonkiisi ayuu noqday oo Alle'na wuu diiday. (eeg 4/Nisa, 51; 5/Maide, 60)

### Aan isla fikirno walaal:

İntee innaga mid ah ayaa garanaysa mawduuca "Dhaaqut"?

İmisa naga mid ah ayaa horay u maqalay ereygan?

Dadka isku sheegaya in ay Culimo mise Daaciyiin yihin, oo sheeganaya in ay Diinteenna na barayaan. Maxay noogu sharxi waayeen mawduucan iyo. Miyayna sii wadi doonan in ay sii sheegin?

Dhammaan Nebiyadii loo soo diray waxay dadka ugu yeedheen xaqiiqdan. Maxaa kuwa maanta dadka ugu yeedha Diinta ay u qariyaan dacwadii guud ee nabiyada oo dhan?

### İn laga fogaado oo bara laga noqdo Dhaaquut waa

Dacwada iyo farriinta guud ee dhammaan Nebiyada,

Dhaaquut waa wax kasta oo Alle (c.j) ka sokow la caabudo. Mowlacyada iyo meelaha dadku ku tukadaan oo gargaar laga raadsado; hogaamiyaasha iyo baarlamaanada soo saara sharciyo aanu Alle (swt) raali ka ahayn, fikradaha la soo jeedinayo in lagu hago nolosha dadka qiyamka qaar. Wadaadada qarinaya xaqqa, oo dadka ku khiyaamaya magaca Islaamka iyo dafiraya xaqiiqda Islaamka. Daaciyaasha dadka kasoo saaraya iftiinka waxyiga una saaraya shirkiga mugdigiisa. Waxyaabaha aan xaqqa aheyn ee dadka iyaga dartood u noolaadan una dhintaan, kuwaani oo dhammi waa Dhaaqudiin la caabudo Alle (swt) ka sokow.

Waxaas oo dhan waxaad maqlaysaa markii ugu horreysay, sax? Markaa hadda jooji oo u leexo Kitaabka İllaahay iyo Sunnada Rasuulkiisa. Kuwaani waa waqtigii aan isku hagaajin lahayn.

Markaan qabriga nala galiyo ama aan istaagno Alle hortiisa, Alle (swt) wuxuu nagu xisaabin doona fariintii uu Rasuulkiisa na soo gaarsiyey oo ah kitaabkiisa.

Qofna yeynaan u ogo'laan inuu nagu khiyaameeyo magaca Alle (swt) iyo Diinta.

Si'aan si wanaagsan u fahamno waxaynu ka warhayn oo ah shuruuddaha kelmadda "Laa'ilaaha İllallah" ay leedahay. Marka hore aan ogaanno waxa dhabta ay yihin arrimaha furaha u ah kelmaddan sida; 'İllah, Cibaado iyo Shirkiga'.



## Ma Garaneysa Sababta lagu Abuuray?

"Sababta uu Alle ii Abuuray annigoo waxba aheyn, ee ii arsaaqaya. Hal-abuurka ugu sharafta badan iga yeelay, oo koonkan iga dhigay kuwa ii adeega Maxaa sabab u ah?" Weligaa ma is weydiisay su'aashan?

**"Waxaan u abuuray Jinni iyo insi in ay i caabudaan oo kaliya."** (51/Zaariyaat, 56)

Ujeedada lanoo abuuray waa Tawxiid. Tawxiidku waa in'aad Addoon Alle (swt) oo kaliya noqotid oo lagu mideeyo cibaadada. Qofka waa in uu Alle (c.j) oo kaliya u sameeya cibaadooyinka sida Salaadda, Soonka, Allabariga iyo Ducada oo kale. iyo guud ahaan waa inuu u habbeeya noloshiisa si waafaqsan sharciga Alle, waana in uu kaliya addeeca sharcigiisa. (eeg 1/Faatixa, 5)

Mar haddii qofka ujeeddada loo abuuray ay Tawxiid tahay, waa inuu marwalba noolashiisa kaalinta koowaad ugu jira. Tawxiidku waa in uu had iyo jeer ahaada ajandaha ugu muhiimsan ee noolashiisa. (Sidoo kale eeg 38/Sad, 27)

Waxa jirta hal sabab oo Alle (swt) uu u abuuray aadanaha oo dhan: waa in la caabuda Alle oo kaliya. kuwaan caabudin Alle (c.j) oo kaliya ama si wadajir ah waxyaabo kale u la caabuda, waxay khiyaameen ujeedadii loo abuuray iyo waxeyna ka baxeen oo buriyeen ballankii Alle ay la galeen.

### Waa maxay Cibaadadu?

Waxa ugu muhiimsan ee aan u baahannahay in aan ogaano si aan ugu sugnaano ujeedka la noo abuuray waa waxa ay tahay cibaadadu. cibaadada waa wax kasta uu Alle (swt) uu jecel yahay oo raali ka yahay oo asiga kaligiisa loo falaayo oo hadal iyo camalba ah.

Tusaale ahaan, Salaaddu waa cibaado. Alle (swt) wuu jecel yahay salaadda, sidaasi darteedna wuxuu salaadda faray mu'miniinta. Salaaddu waxay cibaado noqonaysaa markii Alle kaligiisa loo tukado.

Marka uu qofku yiraahdo, "Waxaan salaadda u tukada Waalidkay, Madaxdeyda ama Dowladdaydda darteed." Haddii qof sidaasi oo kale yidhaahdo ka warama. Qofkaani salaaddiisu majirto, waxeynu ogaaneyna inuu qofkan cibaadada uu u sameeyey cid aan Alle (c.j) aheyn.

### Ducada sidoo kale waa cibaado:

**"Rabbigiina wuxuu yidhi: I barya anna waan idinka aqbalaya. Kuwa iska la weynaada in ay i caabudan, hubaal waxey gali jahannamo iyagoo dulaysan."** (40/Mü'min (Ğafir), 60)

Rasuulku (scw) ayaa akhriyay aayaddan, wuxuuna yidhi:

**"Ducadu waa cibaadada lafteeda."** (Abuu Daawuud, 1479; Tirmidi, 2969)

Qofku waa in uu Alle (c.j) kaliya baryo, marka uu dhib ku jiro waa inuu asiga kaligiisa baryo, Waa in uu Alle oo kaliya kaalmo weydistaa si uu ugu gargaaro oo dhibka ugu saaro. Yacni, Waa inuu marwalba Alle kaalmaystaa. Maxaa yeeley, ducadu waa cibaado iyo Cibaadadana waxaa loo sameeyaa Alle (swt) oo kaliya.

### Xukunka in la siyo Alle (cj) waa cibaado.

**"Ma caabudaysaan Alle ka sokow waxaan magacyo aad magacowdeen aheyn idinka iyo Aabiyaalkiin oon Alle u soo dejinin xujo. Xukunkana Alle mooye cid kale ma leh, wuxuuna faray inaydaan caabudin isaga mooye, Waa tan diinta toosan. Laakiin dadka badankiisu ma o'ga."** (12/Yuusuf, 40)



Ma aha wax dheerad ah in la rumeysto oo sidaasi lagu noolaado in uu xukunka iyo sharci dejinta uu Alle (c.j) kaliya iska leeyahay, ee waa mid ka mid ah mabaadi'da aan laga maarmi karin ee caqiidada Islaamka. In xukunka Alle (c.j) iska leeyahay waxaa lala xadhiidhiyey laba arrimood oo kala ah; 'İn la caabudo Alle (swt) oo kaliya iyo Diin toosan'. Kuwa awoodda xukunka siiya Alle oo aan aqoon sharci aan ahayn sharcigiisa, kuwaas waa addoommo Alle, waxayna ka tirsan yihiin Diinta xaqa ah. Kuwa dhanka kale dhaha, 'gobonimadu si sharuud la'aan ku jirta u aqoonsada mabda' yada mise hay'addaha, kuwaani waa kuwa caabuda magacyo aan Alle (c.j) wax xujo ah kasoo dejinin. Xukunka; yacni sharci-dejinta, sharci go'aamin iyo go'aaminta wixii xaaraan iyo xalaal ah waxaa xaqqaasi iska leh Alle (swt) oo kaliya. İn la rumeysto ficil ahaan iyo caqiido ahaanba inuu xaqqaasi Alle oo kaliya iska leeyahay waa cibaado loo sameynaya asiga. Waa inuu qofka rumeysta inuu xaqqaasi uu Rabbigiisa uun iska leeyahay, oo aan xukun dejinta siinin kuwa Rabbigiisa kula tartamaya arrinkani, oo ah Xildhibaanada, Madaxda iyo Daalimiinta.

### Kalimatul Tawxiid iyo Kalimatul Shahada Ma Taqaan Macnaheeda?

**Kalimatul Tawxiid**

**La:** Majiro

**Illaha:** ilaah ma jiro

**İlla:** (ka baxsan) Waxaa jira mid keliya

**Lallah:** asigana waa Alle

**Kalimatul Shahada:**

**Ashhadu:** waxaan ka marqaati ahay

**An la ilaha:** Ilaah ma jiro

**İlla:** (ka baxsan) Waxaa jira mid keliya

**Lallah:** asigana waa Alle

Markaynu nidhaahno Kalimatul Tawxiid, marka hore, ilaahnimadu waxaan ka dafireyna dhammaan waxyaabaha jira oo dhan. in aanay waxba İllaah ahayn oo aanay noqon karin ayaan aqbaleyna oo soo bandhigeyna. Markaasi kadib waxaan ka marqaati noqoneynaa in İllaahnimada uun Alle (c.j) iska leeyahay, oo asiga yahay İllaaha xaqqa ah ee jira.

### Haddaba waa maxay Illaah?

Ilaah; macneheedu waa macbuud, oo asiga la caabudo, cibaadadana xaq u leh, oo mudan in asaga la caabudo. Annagu markaan dhaheyno "Laa'ilaaha İllallah" run ahaantii waxaynu dhahnaa sidan: "İllaahayow; Ducadayda Soonkayga, Allabaridayda, Salaaddayda iyo Cibaadada oo dhan adiga uun baan kuu sameyn. Waxaad tahay Rabbigeyga iyo midka maamula koonka oo dhan. Adiga ka sakow Ma aqbali doono sharci-dejiyayaal kale. Wixii adiga sax dhahday uun baa sax ah; wixii adiga khalad dhahday ayaa khalad ah. Faa'iidada iyo waxyeelada Adiga ayey gacantaada ku jirta. Waxyaabaha i anfacaya adiga uun baan ku weydiisanaya, waxyaabaha i dhibaateynayana adiga uun baan kaa magan galaya. İn noloshayda ay makhluuqyada haggaan uma ogolaani dooni. Waxaan saaxibadaada ka dhiganaya saaxibadeyda, cadowgaagana cadawgeyga, Hadafkaygu waa inaan gaaro raali ahaanshahaada oo kaliya. Adiga dartaada ayaan u noolaan doona, una dhimman doona."

**Haddaba, waa maxay shirkigu?**

**Shirkiga:** Waa in la caabudo cid aan Alle (c.j) aheyn mise in Alle (c.j) lala caabudo waxyaabo kale.

Cibaado kasta ha ahaate, haddii qofka mid ka mid ah cabaadooyinka uu u sameeyo cid aan aheyn Alle, (c.j) wuxuu qofkaasi u shariik yeelay Alle (c.j).

Bal aynu eegno aayadaha kitaabkeena sareeya ee Qur'aanka kariimka ah ee ku saabsan mawduucan. Waxaan soo barannay in xukunka uu Alle (c.j) iska leeyahay iyo ciddi awooddan asiga siisa, Waxay u hogaansameen Alle (c.j). Kuwa awooddan aan siinin Alle (c.j) sidaani ayuu ku yidhi:

**"Mise waxay leeyihiin iyaga shurako oo u sameeya diin iyo (xukun) aan Alle idmin haddayna jirin kalmadda kala bixinta (qiyaamada) waa la kala xukumi lahaa dhexdooda, daalimiintana waxaa u sugnaaday cadaab daran."** (42/Shura, 21)

Waxyaabaha aan Alle (c.j) aan idmin kuwa sharciyeeya, oo wixii xaaran iyo xalaal ah go'aaminaya, waa kuwa Alle lala shariik yeelo. Sababtoo ah in la dajiyo sharciyo, in la go'aamiyo sharciyo iyo in la la qoro dastuur; Waa mid ka mid ah Sifaadka Alle (c.j) ee ugu caansan ee ugu horeeya. (eeg 12/ Yuusuf, 40; 18/Kahf, 26) Alle (c.j) wuxuu cambaareynayaa kuwa awoodda xukunka siya, kuwa sameeya sharci aan waafaqsanayn shareecadahiisa. İyo wuxuu caddeynaya in cidda ay awooddan siyeen ay asiga ula shariik yeeleen:

**"Waxay İllaahyo ka yeesheen Alle ka sakow culimadoodii,suufiyadoodii, iyo ciise ibnu maryama, waxaan cibaadada ilaahay kali ah ahaynna lama farin. İllaahay mooyee Alle kalana ma jiro oo cibaadada xaq u leh, Alle'na waa ka nasanyahay waxay la wadaajin."** (9/Tawbah,31)

**Ma ogtahay siduu Rasuulku** (scw) **u fasiray aayaddan?**

**'Waxay İllaahyo ka yeesheen Alle ka sakow culimadoodii, suufiyadoodii, iyo ciise ibnu maryama' Mar uu Rasuulka** (scw) **uu akhrinaayey aayaddan, Cadiy ibnu Xaatim, oo xiligiisa jaahilnimada Kiristaan ahaa, iyadoo qoortiisa iskutallaabta qalin ah ku jirta ayuu Rasuulka u yimid. 'İyaga cullimadoodi iyo suufiyadoodi ma caabdin' ayuu yidhi. Rasuulku** (scw) **wuxuu yidhi: "kuwa hogaami diineedka ah waxay xaaraantinimeeyeen wuxuu Alle xalaal dhahay, waxay kaloo xalaal ka dhigeen wuxuu xaaran dhahay. Iyaguna way u hogaansameen oo raaceen. Taasi waa cibaadada ay hogaami diineedkooda u faleen."** (Tirmidhi, 3095; Tafsiiru Ibni Ebî Xaatim, 2/1784, qisooyinka la tiriyey 10057-10058)

— Waxaan halkan ka fahmayna Nabigeena (scw) sida uu u fisiray aayadan; İnuu Alle (c.j) oo kaliya yahay cidda go'aamineysaa wixii xaaran iyo xalaal ahiba. Sababtana waa inuu asiga yahay "Er-Rabb". Rabb; mid tarbiyeeya, mid hagaajiya, mid maamula, oo rogga ayaa laga wadaa. Wuxuu Alle (c.j) Dadka ku edbiyaa sharciyada uu asiga u dejiyey, wuxuu bulshooyinka ku kala dambayn siiyaa sharciyada uu isaga u dejiyey.

— Aqoonyahan, Indheer-garad, Wadaad, Xildhibaan, Maamule ama Hogaamiye Beeleed... Qofkii midkoodna awooddas siiya, Alle ka sakow iyaga ayuu Rabbi ka dhigtay.



Waxaan soo barannay in Alle (swt) oo kaliya in la baryo ay cibaado tahay. Rabbigeena wuxu ku yidhi kuwa barya cid aan isaga aheyn sida; kuwa dadka qaar u rumeysan yihin in ay awliyo yihin, oo barya qubuurahooda iyo ruuxooda.

**"Ducada xaqqa ah waa midda İllaahay loo sameeyo, waxa ka soo hadhayna kuwa barya waxba uma ajiibaan (kuwa İllaahay ka sokow cid kale baryada) sida waxey la mid yihin mid ku fidiyey Gacmihiisa Xagga Biyaha inay Afkiisa gaadhaan, mana gaadhayaan, Baryada Gaaladuna waxaan baadi ahayn ma aha."** (13/R'ad, 14)

**"Habeenka ayuu İllaahay dhexgaliyaa maalinta Maalintana wuxuu dhexgaliyaa Habeenka, Qoraxda iyo bishana wuu sakhiray mid kastana wuxuu ku socda muddo magacaaban, saas waxa falana waa Rabbigiina, isagaana xu- kunka iska leh, waxaadse baryeysaan (caabudaysaan) oo İllaahay ka soo hadhay ma hantaan xuub laf timireed. Hadaad iyaga baryadaan ducadiina ma maqlaan, xitta hadey idin maqlaan idinma jawaabi karaan, Maalinta Qiyaamana way diidi shirkigiina, cid wax walba ka warqaba sida khabiir o kale ah oo sidaani wax kuugu warrama ma jiro."** (35/Fâtır, 13-14)

**"Diinta khaaliska ahna waxay u sugnaatey İllaahay, kuwa ka yeesha İllaahay ka sokow awliyo waxay odhan uma caabudno inay İllaahay noo dhaweeyaan mooyee, İllahaayba kala xukumi doona dhexdooda waxay isku khilaafeen, shaki la'aan İllaaheyna ma hanuuniyo ruux beenaale ah oo gaal ah."** (39/Zumer, 3)

Shirkiga salkiisa waxa fidhiya waa araktida "Alle fog" iyo "aadmiga aan dhamaystirnayn" Dadka qaar marka la weydiyo maxaad u baryeysan makhluuqyada, waxey dhahaan; "Yaan nahay marka aan Alle (c.j) si toos ah u barinneyno? Dembiyadeena aad bay u badan yihiin. Sideen İllaahay ku waydiin karnaa afafkan wasakhaysan?" Araktidan khaldan, qofka waxay ku riixaysa inuu raadiyo awliyo usoo dhawaysa Alle (swt). (eeg 2/Baqara, 186; 5/Maide, 35; 34/ Seba', 22-23; 39/Zumer, 43; Sidoo kale eeg 6/Ancaam, 14)

Haddaad u fiirsato, Wuxuu Alle (swt) inoo sheegay kuwa baryaya asiga ka sokow waxyaabo kale, inay caabudeen makhluuqyadaas; kuwa sidoo kale falkaan falaya ee asiga u shariik yeelen oo beenalayaal yihin.

Ha iloobin in ay shirki tahay inaad cid kale caabuddo Alle (c.j) ka sokow, shirkiguna waa dulmiga ugu weyn. U fiirso waanada uu Luqmaan (cs) uu u jeediyay wiilkiisa:

**"(xusuuso) markuu ku yidhi Luqmaan Wiilkiisa isagoo waanin Wiilkayow Alle ha u shariik yeelin, shirkigu waa dulmi weyn."** (31/Lokmân, 13)

Alle (swt) in wax lala wadaajiyo waxay ka dhigaysaa camalkaaga oo dhan mid aan waxba tarayn iyo Waxaad noqon doontaa mid ka mid ah kuwa khasaaray adduun iyo aakhiraba.

U fiirso digniintii uu Alle (swt) u soo waxyooday dhammaan nebiyadiisa oo dhammi:

**"Waxa dhab ahaan loogu waxyooday adiga iyo kuwii kaa horreeyeyba Nabiyow haddaad u shariik yeesha (İllaahay) waxaa buri camalkaaga, waxaadna ka mid noqon kuwa khasaaray."** (39/Zümer, 65)



Dambi dhaafka, naxariista iyo caffinimada Alle (c.j), inkasta oo ballaadhan tahay, ku filan tahay, oo soo koobi kartaa dhammaan makhluuqyada oo dhan, haddana haddii aad u shiriik yeesho Alle, wanaaggan ayaa lagaa reebayaa:

**"Alle ma caffiyo in loo shariik yeelo wuxuuse ka caffiya waxaa wixii ka soo hadhay Cidduu doono, Ruuxii u shariik yeela Alle wuxuu been abuurtay dambi weyn."** (4/Nisa, 48)

Haddii qofka asigoo aan ka towbad keenin shirkiga ku dhinto, waa waxa kaliya ee aanu Alle (c.j) aanu caffin doonin. Danbiyada aan shirkiga ahayn oo dhan waa danbi Alle (c.j) rabbitaankiisa ku xidhan, hadduu doono wuu cafin, hadduu dooninna ma cafin.

Shirkigu waa wax kasta oo camal ah oo islaamka u aqbalay cibaado. Cibaadadaasna Alle ka sokow waxyaabo kale loo sameeyo, mise mid ka mid ah sifooyinka Alle oo la siyo makhluuqyada. Shirkigu wuxuu leeyahay noocyo badan; Shirki jacaylka (eeg 2/ Bakara, 165), shirkiga addeecidda (eeg 9/ Tawba, 31), shirkiga ducada iyo cibaadada (eeg 7/A'râf, 37; 10/Yûnus, 106), Shirkiga sharci dejinta (eeg 18/Kahf, 26; 42/Shura, 21), in la caabudo makhluuqyada qaar si ay bulshada isugu soo dhawaadan (eeg 29/Ankebut, 25)...

Sida aan kor ku soo xusnay daliillada, qofka Alle (swt) wax la wadaajiya. Alle (swt) ayuu beentii ugu weyneyd ka sheegay oona dulmigii ugu weyna ayuu sameeyey. Sidaa darteed, dhammaan camalladiisii waxay noqdeen kuwo aan waxba u tarayn. Sidaasi awgeedna,qofkaasi Jannada waa laga xaarantameeyey:

**"waxaa Gaaloobay kuwa Yidhi Alle waa Masiixi Ibnu Maryama, Wuxuuna yidhi Masiix (Ciise) Banii Israa'iilow Caabuda Alle ee ah Rabbigeyga iyo Rabbigiina, Ruuxii u Shariig Yeela Alle (wax la wadaajiya) wuxuu Alle ka Xarrimay Jannada wuxuuna ku hooyan Naarta Daalimiintana ma helaan Gargaare."** (5/Mâide, 72)

**Haddaba, maxaa annaga kuugu yeedhayna?**

Waxaa adiga kuugu yeedhaynaa; Diinta nabiyada oo dhan iyo tan kaliya ee Alle (swt) aktiisa ansax ka ah.

Adiga; waxaan kuugu yeedhayna Diinta oo loo khaalis yeelayo Alle (swt) oo kaliya, lana caabudayo asiga kaligiisa, oo aan isaga loo shariik yeeleynin. Yacni, Tawxiid daahir ah oon Alle loo shariik yeeleynin ayaan kuugu yeedhaynaa.

Adiga; waxaan kuugu yeedhayna Diinta oo loo khaalis yeelayo Alle (swt) oo kaliya, lana caabudayo asiga kaligiisa, oo aan isaga loo shariik yeeleynin. Yacni, Tawxiid daahir ah oo Alle loo shariik yeeleynin ayaan kuugu yeedhaynaa.

**Waxaan idin kugu yeedhaynaa dambi dhaafka İllaahay** (swt) **iyo hoyga nabada ee Jannatul Firdows.**

Duruusta Tawxiidka
Majaladda Tawxiidka
Macnaha Tawxiidka
Kitaabka Tawxiidka



# Maxaa loo baahan yahay in'aad sameyso si ay kuu anfacdo kelmadda La İlaha İllallah?